| | |
|---|---|
| IDENT | PAS35 |
| Nooca Dhukumiintiga | Xeerka |
| Nooca La xariira | Shabakada CVMC/PMC/UVMMC |
| Jagada Mulkiilaha | Dir Patient Access |
| Jagada Sarkaalka Ansixinaaya | Ku xigeenka Shakabada Dakhliga |
| Taariikhda Dhaqangalka | 7/1/2023 |
| Taariikhda Dib u eegista Xigta | 10/1/2023 |

**JAGADA:** Limitation on Charges (AGB)

**UJEEDADA:** Sidii loo dejin lahaa xeerka iyo habraaca kharashaadka lagu dalacaayo bukaanada u qalma kaalmada dhaqaalaha.

**BAYAANKA XEERKA:** Sida ku xusan xeerarka IRS 501r, University of Vermont Health Network – Iskaashatada VT waxay yareyn doonaan kharashaadka lagu dalaco bukaanada u qalmada Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha waxayna ka dhigi doonaan kharashaadka Sida caadi ah Loogu dalaco (AGB) bukaanada kujira caymiska si ay u helaan daryeelka xaaladaha degdega ah ama daryeelka caafimaad ahaan muhiimka ah. Sida ku xusan Xeerka H.287 ee Gobalka Vermont, waa in hoos loosii dhigaa kharashaadka lagu dalaco bukaanka aan caymiska lahayn.

**Xeerku wuxuu khuseeya Iskaashatadaan UVMHN ee soo socota:**

Central Vermont Medical Center
130 Fisher Road
Berlin, VT 05602

Porter Medical Center
115 Porter Drive
Middlebury, VT 05753

The University of Vermont Medical Center
111 Colchester Ave
Burlington, VT 05401

**HABRAACA:**

1. University of Vermont Health Network, Iskaashatada VT waa inay xisaabiyaan kharashaadka sida caadiga ah sanadkii loogu dalaco bukaanada caymiska kujira waana inay hoos dhigaan, kharashaadka lagu dalaco bukaanada marka ay helaan adeegyada kaalmada dhaqaalaha u qalma. AGB waxaa la xisaabin doonaa Oktoobar waxaana lagu dabaqi doonaa dhammaan adeegyada la bixiyo sanadka cusub.

2. Iskaashatada UVMHN ee VT waa inay isticmaalaan nidaamka dib u eegista si ay u xisaabiyaan AGB waxaana kujiri doonaa bixiyaasha dawlada iyo ganacsiyada; gaar ahaan Medicare, Medicare ACO, Medicare Advantage, Medicaid iyo ka ganacsadayaasha caymiska /midka gaarka ah.

3. Sida ku xusan xeerarka IRS, Iskaashatada UVMHN waa inay kujiraan dhammaan gunnooyinka la oggolaaday sanadkii hore, oo ay kujiraan kharashaadka uu masuulka ka yahay bukaanku. Gunnooyinka dib loo eegay waa kuwa la bixiyay inta lagu jiray 12 kii billood ee lasoo dhaafay, ee ma ahan adeegyada la bixiyay waqtigaas oo dhan. Haddii codsiga aan lasoo gabagabeyn maalinta ugu dambeysa ee 12 ka billood, laguma dari doono xisaabta sanad xisaabeedkaan.

4. Marka la xisaabinaayo kharashka guud ee lagu soo dalacay, waxaan ku darnaa lacagta guud ee ay oggolaato shirkada caymiska iyo cadadka lacagta bukaanku bixin doono. Lacagtan waxaa kujiri doona lacagaha bukaanku qayb bixiyo, qoondada caymiska iyo lacagaha la jarto.

5. Si aan u hubino inaan ku darno dhammaan kharashaadkaas/adeegyadaas oo leh wax ka badel la oggol yahay, UVMHN VT Partners waxay yareyn doonaan wadarta la oggol yahay waxayna ka dhigi doonaan isbadelka la sameeyay ee oggolaansho la'aanta ah. Kharashaadkaan ma uusan oggolaan bixiyuhu waxaana laga jari doonaa cadadka kharashka guud,

6. Xisaabta waxaa kujiri doona kharashka guud ee uu oggol yahay bixiyuhu, oo laga jaray lacagha uusan oggolayn maamulka ee lagu dabaqo; cadadkan ayaa markaa loo qaybiyaa kharashyada guud ee lagu soo dallacay sheegashooyinkaas.

7. Xisaabaadka sanadka xisaabeedka 2024 (Oktoobar 1, 2023 – Sebteembar 30, 2024):

   a. Central Vermont Medical Center: 57%
   b. Porter Medical Center: 53%
   c. The University of Vermont Medical Center: 57%

8. Sida ku xusan Sharciga Gobalka Vermont, bukaanada aan caymiska haysan waxay heli doonaan qiimo dhimis dheeraad ah oo ah 40% kadib marka AGB lagu dabaqo. UVMHN VT Partners waxay xisaabiyeen qiime isku dhaf ah oo loogu talagalay wax ka badelkaan. Inkastoo uusan sharcigu dhigeen, hadana xeerarkeena ayaa qiimaha isku dhafka wax ka badelka ugu fiican u isticmaali doonaa labadaba bukaanada caymiska leh iyo kuwa aan lahayn ee yimaada dhammaan isbitaalada Vermont.

9. Xisaabta qiimaha isku dhafka ah ee Sanad Xisaabeedka 2024 (Luulyo 1, 2024 – Sebteembar 30, 2024):

   a. Central Vermont Medical Center: 75%
   b. Porter Medical Center: 75%
   c. The University of Vermont Medical Center: 75%

10. Marka bukaanku gadaal ka oggaado inuu u qalmo iyo u hoggaansanaanta shuruucda badqabka, UVMMC waa inay soo celisaa lacag kasta oo bukaan oo dheeraad ah oo ah AGB laguna bixiyay daryeel u qalmi lahaa kaalmo 240 maalmood ah gudahood oo laga bilaabaayo marka la ansixiyay codsiga. Fiiro gaar ah, lacagaha dheeraadka ah ayaa laga yaabaa in lagu dabaqo lacagta haraysa ee furan kahor inta aan la meelmarin lacagta dib loogu celinaayo bukaanka.

**QORSHAHA KORMEERITANKA:**

Xisaabinta Tafatir ahaaneed ee sanadlaha ah
Dib u eegista Ootamaatiga ah ee EHR

**QEEXITAANO:**

**Wax ka badalitaanka Maamulka:** Wax ka badelka ama ka saarista khidmada akoon, tusaale ahaan, ogolaansho la'aan, iwm.

**Qadarka La ogol yahay:** Waa qorshaha lacag bixinta ugu badan ee lagu bixin doono adeega daryeelka caafimaadka ee la daboolay.

**Kharashaadka Guud:** Waa kharashka guud ee lagu bixiyay adeegg la bixiyay kahor wax ka badelada ama qiimo dhimisyada inta aan la sameyn.

**Xadidaada Kharashaadka:** Isbitaal kasta oo cashuur dhaaf loo sameeyay waa inuu xadidaa cadadka lacagta guud ee lagu dalaco marka daryeelka xaaladaha degdegga ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ay helayaan bukaanada u qalma kaalmada dhaqaalaha marka loo eego lacagta sida caadi ahayd lagu dalici lahaa bukaanada caymiska haysta, aana isticmaali karin kharashyada guud.

**Nidaamka Dib u eegista:** Waa dib u eegis lagu sameeyo dhammaan gunnooyinka ay bixiyeen caymisyadu sannad maaliyadeedka ka hor.

**XEERARKA LA XARIIRA:**

PAS1 Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha

**TIXRAACYADA:**

IRC § 501®(4):
IRC § 501®(5):

IRC § 501®(6):
H.287 (Xeerka 119)
26 C.F.R.§1.36B-2
VT Xeerka 18, Farqada 221, Farqo Hoosaadka 10:
§ 9481 Qeexitaanada
§ 9482 xeerarka kaalmada dhaqaalaha ee loogu talagalay xarumaha daryeelka caafimaadka bixiya ee waawayn
§ 9483 Meelmarinta xeerka kaalmada dhaqaalaha
§ 9484 Xogta iyo waxbarashada dadwaynaha
§ 9485 Mamnuucida iibinta rahmada caafimaadka
§ 9486 Mamnuucida xuquuqaha dhaafitaanka
§ 9487 Meelmarinta

**DIB U EEGAYAASHA:**

Amy Vaughan, Shabakada Maaliyada Dakhliga iyo Magdhowga
Craig Bennett, Madaxa guud ee Shakabada U hogaansananata iyo Sarkaalka Ilaalinta Xogta
Melissa Laurie, Kormeera Shirkada/Ku xigeenka Shabakada
Gina Slobodzian, Agaasimaha Shabakada Adeegga Macmuulka
Chris Cook, Agaasimaha Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ee PMC
Amy Gibbs, Agaasimaha Maaliyada iyo Xisaabaadka CVMC

**MULKIILAHA:** Shannon Lonergan, Ogolaanshaha Agaasimaha Xogta Bukaanka

**SARKAALADA ANSIXINAYA:** Michael Barewicz, Ku xigeenka Shabakada Dakhliga